Hagaha Waxbarashada Gaarka ah

HAGAHA HEERARKA QOYSKA EE MINNESOTA

Fahmidda Waxbarashada Gaarka ah
Sahminta Geedi Socodka Waxbarashada Gaarka ah
Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed
Xuquuqaha Sharciga & Ilaalinada
Kheyraadka & Talada

great MN SCHOOLS

Horudhac

Hagahani wuxuu waalidiinta & mas'uuliyiinta siinayaa meel ay ka bilaabaan barashada sida waxbarashada gaar ah ay u shaqayso. Waxaanu eegi doonaa aasaaska, oo ay ku jiraan xuquuqaha sharciga ah, wakhtiyada muhiimka ah, iyo sida aad u taageeri karto ilmahaaga.

QAYBTA 1

Fahmidda Waxbarashada Gaarka ah

WAXBARASHADA GAARKA AH WAXAY ILMAHAAGA MARIN U SIINAYSAA KHEYRAAD IYO TAAGEERO KA CAAWISA INAY GUULAYSTAAN

Waxbarashada gaarka ah waa koox adeegyo ah oo la siiyo ardayda uqalanta ee naafada qaba. Ujeedada adeegyadani waa in la xaqiijiyo in ardayda oo dhan ay u siman yihiin helitaanka waxbarashada. Waxbarashada gaarka ah waxay raacdaa sharciyo u taagan inay ilaaliyaan xuquuqda ardayga.

WAXBARASHADA GAARKA AH WAXAY KOBCISAA CARRUURTA

Waxbarashada gaarka ah kama dhigna in canugaaga ay wax ka khaldan yihiin. Waxay ka dhigan tahay in qaabka loo qaabeeyay dugsiga uusan daboolaynin baahiyaha gaarka ah ee canugaaga. Waxbarashada gaarka ah waxay buuxisaa daldaloolada u dhexeeya waxa dugsiga uu horay u bixinayay iyo waxa canugaaga uu u baahan yahay. Ka ahaan waalidkooda, waxaad awood u leedahay inaad qayb ka qaadato xaqiijinta in si guul leh loo qabto, siinta ilmahaaga fursad waxbarasho oo la mid ah tan carruurta oo dhan.

TALLAABOOYINKA GEEDI SOCODKA WAXBARASHADA GAARKA AH

1. **Aqoonsashada Walaacyada** – Macallimiinta, waalidiinta, ama daryeelayaasha waxay ogaadaan in ilmo uu u dhibtoonayo tacliin ahaan, bulsho ahaan, ama habdhaqan ahaanba

2. **Gudbin** – Waalid/masuul ama shaqaale dugsi ayaa codsada qiimaynta waxbarashada gaarka ah

3. **Oggolaanshaha Waalidka & Qiimaynta** – Dugsiga wuxuu helaa oggolaanshaha waalidka wuxuuna sameeyaa qiimaynta

4. **Natiijada Qiimaynta** – Dugsiga wuxuu bixinayaa natiijada qiimaynta

5. **Go'aaminta Uqalmitaanka** – Kulan ayaa la qabtaa si looga hadlo loona go'aamiyo in ardayga uu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah

6. **Abuurista IEP** – Kulan ayaa la qabtaa si loo sameeyo Individualized Education Program (Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed, IEP)

7. **La Socodka Horumarka** – Xusuus-qorka horumarka oo joogta ah ayaa la ururiyaa sanadka oo dhan si loo diiwaangeliyo meelaha uu ka jiro kobaca iyo meelaha uu walaaca ka jiro, taasoo kadibna lala wadaago waalidka/masuuliyiinta

8. **Dib-u-eegis** – Ugu yaraan hal mar sanadkii, kooxda IEP waxay eegaan barnaamijka IEP si ay u xaqiijiyaan inuu weli macno samaynayo. Ugu yaraan halmar 3-dii sanaba, kooxda IEP waa inay dib-u-qiimeeyaan ardayga si ay u ogaadaan inuu wali u baahan yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah

9. **Qorshaynta Ka Bixitaanka, Qalin-jebinta, ama Kala-guurka** – IEP-yada waa inay leeyihiin qorshe looga guuro barnaamijka waxbarashada gaarka ah

QORSHAYAASHA SHAKHSI AHAANEED EE ARDAY KASTA OO GAAR AH

BARNAAMIJYADA WAXBARASHADA SHAKHSI AHAANEED (IEP-YADA)
Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP) waa qorshe loogu talagalay ardayda naafada ah ee qaata adeegyada waxbarashada gaarka ah. IEP waa heshiis sheegaya waxa ay yihiin baahiyaha ardayga iyo sida dugsiga uu u dabooli rabo. Dugsigu waa inuu raacaa ballanqaadyada ay ku sameeyaan IEP-ga. Shaqaalaha dugsiga waxay la shaqeeyaan waalidiinta – iyo ardayga iyadoo ay ku xiran tahay da'diisa – si ay u qoraan barnaamijka IEP-ga.

QORSHAYAASHA 504
Qorshaha 504 wuxuu xaqiijiyaa in ardayda qabta naafooyinka la aqoonsadayay helaan waxa ay u baahan yihiin. Si ka duwan IEP-ga, Qorshaha 504 kuma lug yeesho waxbarasho gaar ah laakiin waxa uu diiradda saaraa bixinta fursad loo siman yahay iyadoo wax loo habaynayo. Shaqaalaha dugsiga waxay la shaqeeyaan waalidiinta – mararka qaarna ardayga – si ay u qoraan qorshaha 504.

XUQUUQAHA SHARCIGA

SHARCIYADA ILAALIYA ARDAYDA NAAFADA AH

- Americans with Disabilities Act (Xeerka Dadka Naafada Maraykanka, ADA) - wuxuu dugsiyada ka ilaaliyaa takoorka kadhanka ah ardayda naafada ah
- Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada Qaba, IDEA) - wuxuu dugsiyada kaga baahan yahay inay daboolaan baahiyaha gaarka ah ee ardayda naafada ah iyada oo aan wax kharash ah ka bixin qoyska
- Qaybta 504 (Xeerka Baxnaanada) - wuxuu dugsiyada kaga baahan yahay inay meesha ka saaraan caqabadaha ardayda naafada qaba kahortaagan inay waxbartaan
- Ilaalinada Habraaceed - Sida uu Dhigayo IDEA, kuwani waxay ilaaliyaan ardayda naafada qabta iyo qoysaskooda. Waxaa ka mid ah xeerarkaan:
    - Dugsiyadu waa inay oggolaansho qoraal ah ka helaan waalidiinta kahor inta aysan gaarin go'aamada waawayn ama aysan bixin adeegyada waxbarashada gaarka ah
    - Waalidiinta waxay heli karaan nuqulada diiwaanada ilmahooda, taasoo ay tahay in ay sir ahaadaan wakhti kasta
    - Dukumiintiyo kasta ama foomam kasta waa in lagu helaa luuqadda looga hadlo guriga waalidiinta

TALLAABOOYINKA LAGU RAADIYO DHEXDHEXAADINTA

1. Dib-u-eeg IEP-ga
2. Warqad u qor dugsiga
3. La kulan dugsigaaga si aad isugu daydo inaad xalliso arrinta
4. Warqad u qor degmada dugsiga
5. Haddii aadan helin xal, waxaad raadin kartaa wakaalad gobol ama federaal.

QAYBTA 2

Sahminta Geedi Socodka Waxbarashada Gaarka ah

WAXAA JIRA TALLAABOOYIN CAD, WAKHTIYO, IYO XUQUUQO KU ILAALINAYO ARRINTAN OO DHAN. TALLAABO KASTA, XAQIIJI INAAD WAX KASTA KU HAYSATO QORAAL.

Si uu ugu qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee hoos yimaada IDEA, ardaygu waa inuu qabaa naafo saamaynaysa sida uu wax u qabanayo dugsiga. Waxaa jira shuruuc qeexaya sida arday uu ugu qalmo adeegyada iyadoo la buuxinayo shuruudaha astayn naafo waxbarasho oo gaar ah.

Haddii aad oggolaansho siiso, dugsigu wuxuu ku tijaabin karaa ilmahaaga si bilaash ah si loo eego inuu uqalmo astayn naafo gaar ah. Tani waa ay ka duwan tahay ogaanshaha caafimaad ee dhakhtarka. Canugaaga wuxuu u baahan karaa xaqiijin ogaansho gaar ah oo ka socoto dhakhtar si loo siiyo adeegyada ka baxsan dugsiga.

Astaynta naafada waxbarasho waxaa ka mid ah:

- Ootisamka (Autism Spectrum Disorder, ASD)
- Indho la'aanta ama naafada aragga
- Dhagoolnimada ama naafada maqalka
- Naafooyinka ama dibu-dhacyada koritaanka caqliga (Developmental cognitive disabilities or delays, DCD)
- Naafooyinka badan
- Cilladaha shucuurta ama habdhaqanka (Emotional or behavioral disorders, EBD)
- Naafada kale ee caafimaadka (sida ADHD)
- Naafada jirka
- Naafada barashada gaarka ah (sida akhris-qoraalka)
- Naafada hadalka ama luuqadda
- Dhaawaca Jugta Maskaxda

GEEDI SOCODKA WAXBARASHADA GAARKA AH

Waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga waxay ka wada shaqeeyaan inay go'aamiyaan waxa ardayga uu u baahan yahay iyo sida ugu fiican ee lagu daboolo. Tallaabooyinka waa isku mid arday kasta, waxaana jira xeerar ku saabsan inta ay qaadan karto tallaabo kasta.

TALLAABADA KOOWAAD

Aqoonsashada Walaacyada

Dugsiyada waxay leeyihiin habab lagu ogaado ardayda u baahan caawimaad dheeraad ah. Waxay isku dayaan wax ka qabashooyin kala duwan. Haddii ardaygu aanu soo hagaagin, waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo in si buuxdo loogu qiimeeyo adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Haddii waalidiintu ay dhibaatooyin ku arkaan waxbarashada ilmahooda, waa ay gudbin karaan. Waalidiintu waa inay tixgeliyaan inay ilmahooda u gudbiyaan qiimaynta waxbarashada gaarka ah haddii:

- Canugaaga uu qabo naafo uu ka helay dhakhtar.
- Aad ka walaacsan tahay horumarka canugaaga uu u samaynayo jir ahaan, shucuur ahaan, bulsho ahaan, ama maskax ahaan.
- Aad ka walaacsan tahay maqalka, hadalka, ama aragga canugaaga.
- Canugaaga uu ku dhibtoonayo waxbarashadiisa ama uusan waxbaranaynin.
- Aad ka walaacsan tahay habdhaqanka canugaaga.

Haddii aadan hubin in canugaaga aad u gudbiso adeegyada waxbarashada gaarka ah, kala hadal macalinkaaga ama dugsigaaga.

MA KUU JOOGAA ILMO YAR?

Ardayda waxay uqalmi karaan adeegyada waxbarashada gaarka ah isla marka ay dhashaan. Daryeelayaasha waa ay u gudbin karaan haddii ay u maleeyaan in ilmahooda ay u qalmi karaan, oo qiimaynta carruurnimada hore iyo adeegyadu waa u bilaash qoysaska oo dhan. Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka eeg Help Me Grow barta helpmegrowmn.org.

TALLAABADA LABAAD

Gudbinta

Gudbinta waxaa samayn kara macalin, waalid, ama shaqaale kale oo dugsi marki ay u maleeyaan in ardaygu naafo qabo. Waalidiinta waxay gudbin samayn karaan iyagoo la hadlaya macalin, isku-duwaha waxbarashada gaarka ah, ama maamulaha. Codsi waa in lagu qoraa warqad ama iimayl oo lagu daraa magaca canugga, walaacyada, iyo xog kasta oo kale oo muhiim ah.

Dugsigu waxa uu xaq u leeyahay inuu diido codsiga qiimaynta haddii uu rumaysan yahay inaysan jirin calaamad muujinaysa naafo. Xaaladan, dugsigu waa inuu bixiyaa ogaysiiska qoran ee hore (PWN) 14 maalmood gudahood marka la codsado. Ogaysiiska PWN waa inuu sharraxaa sababta uu dugsiga u diiday codsiga.

Si aad u hesho tusaalaha warqadda gudbinta, booqo **understood.org/en/articles/download-sample-letters-for-requesting-evaluations-and-reports**

TALLAABADA SADDEXAAD

Oggolaanshaha Waalidka & Qorshaynta Qiimaynta

Kadib marka gudbinta la sameeyo, dugsiga wuxuu haystaa 15 maalmood oo dugsi oo uu ku helo oggolaanshaha waalidka oo qoran si uu u sameeyo qiimaynta. Dugsiyada waxay kulan la yeelan karaan waalidiinta si ay u qorsheeyaan qiimaynta. Waalidiintu waa inay helaan Ogaysiis Hore oo Qoran (PWN) oo sharraxaya qorshaha qiimaynta.

TALLAABADA AFARAAD

Natiijada Qiimaynta

Kadib marka uu helo ogaysiiska PWN oo saxiixan, dugsiga wuxuu haystaa 30 maalmood oo uu ku bixiyo natiijada qiimaynta. Tani waxay fursad u siinaysaa waalidiinta inay soo gudbiyaan wixi su'aalo ama walaacyo ah oo ku saabsan qiimaynta. Waalidiintu waa inay hubiyaan in dhammaan walaacyadooda ay ku jiraan warbixintan. Qorshaha iyo adeegyada waxaa kaliya ku jiri kara waxyaabaha ka soo baxa warbixintan, marka haddii ay wax maqan yihiin ama khaldan yihiin, waa markii la hagaajin lahaa.

TALLAABADA SHANAAD

Go'aanka Uqalmitaanka

Kadib marka uu helo ogaysiiska PWN ee saxiixan, dugsigu waxa uu haystaa 45 maalmood oo uu ku qabto Shirka U-qalmitaanka si looga hadlo natiijada & go'aaminta in ardaygu u qalmo waxbarashada gaarka ah.

Haddii uu uqalmo, Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP) ayaa la abuuraa. Waxbadan oo ku saabsan barnaamijyada IEP ka ogow Qaybta 3.

Haddii canugga uusan uqalmin waxbarashada gaarka ah, dugsiga waxa uu ka hadli doonaa siyaabo kale oo lagu caawiyo canugga. Tani waxaa ku jiri kara Qorshaha 504, taasoo ka caawin karta canugga inuu ku guulaysto fasalka caadiga ah. Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay racfaan ka qaataan go'aanka haddii aysan ku raacsanayn.

TALLAABADA LIXAAD

IEP Abuurista

Kadib go'aanka uqalmitaanka, dugsigu waxa uu haystaa 30 maalmood oo uu ku qabto kulanka IEP. Kulankani waxaa qayb ka ah waalidiinta, macalimiinta, iyo khabiiro si loo abuuro qorshe ku wajahan baahida ardayga. Inta lagu jiro kulanka IEP ee ugu horreeya, kooxdu waxay dib-u-eegis ku samaynaysaa natiijooyinka qiimaynta. Waxay abuuraan IEP ay ku jiraan waxqabadka hadda ee ilmaha, yoolalka sanadlaha ah, iyo adeegyada canugga uu heli doono.

Kadib kulanka IEP, waalidiinta waxay heli doonaan Ogaysiis Qoran oo Hore (PWN), bog la saxiixo, iyo nuqul ka mid ah IEP-ga. Waalidiintu waa inay ka jawaabaan bogga saxiixa 14 maalmood gudahood. Xulashooyinku waa:

1. Ku raacitaanka soo jeedinta iyo oggolaansho lagu sii guda galo
2. Diiditaanka soo jeedinta oo dhan iyo oggolaansho u diidista in la guda galo
3. Ku raacitaanka qayb ka mid ah soo jeedinta iyo diidmada kuwa kale

IEP-yada la cusboonaysiiyay (aan ahayn IEP-ga ugu horreeya ee canugaaga), dugsiyadu uma baahna oggolaanshahaaga si loo sii wado – waxay kaliya u baahan yihiin in aadan diidin. Haddii aadan ku soo jawaabin 14 maalmood gudahood marka IEP-ga la saxo, waa ay dhaqangeli doontaa. Aamusnaantu macnaheedu waa aqbalitaan, marka hadalkaaga ku gudbi 14 maalmood gudahood haddii aad diidan tahay.

Haddii waalidiintu diidaan qayb ka mid ah IEP-ga, dugsigu waa inuu bixiyaa Shir Xallin ah oo lagu xallinayo khilaafyada.

TALLAABADA TODDOBAAD

Dib-u-eegis

Kooxda IEP waxay dib-u-eegis ku samaysaa IEP-ga ugu yaraan halmar sanadki. Saddexdi sanaba mar, ardayga dib-u-qiimayn ayaa lagu sameeyaa. Ardaydu uma baahna inay buuxiyaan shuruudaha uqalmitaanka inta lagu jiro muddada dib-u-qiimaynta, waxay kaliya u baahan yihiin inay muujiyaan inay weli u baahan yihiin adeegyada.

TALLAABADA SIDDEEDAAD

Qorsheynta Ka Bixitaanka, Qalin-jebinta, ama Kala-guurka

Ka Bixitaanka Waxbarashada Gaarka ah: Ardayda waxay joojin karaan qaadashada adeegyada waxbarashada gaarka ah marka ay gaaraan yoolalkooda IEP-ga ama aysan u sii baahnayn taageero. Tani waxay ku lug leedahay dib-u-qiimayn iyo la kulanka waalidiinta, halkaas oo ay tahay inay aqbalaan in ilmahoodu u baahnayn adeegyada waxbarashada gaarka ah.

QALINJABINTA

Dhammaan ardayda ka qalin-jebisa dugsi sare gudaha Minnesota waxay helaan dhiblooma isku mid ah. Dhibloomada ma muujinayso in ardaygaaga uu qabo naafo. Kooxda IEP ayaa ku go’aamisa in arday uu qalin-jebinayo iyo in kale:

1. Buuxinta shuruudaha Gobolka iyo degmada ee qalin-jebinta.
2. Buuxinta shuruudaha gaarka ah ee IEP-ga ardayga.

Ardayda naafada ah waxay joogi karaan dugsiga ilaa dhammaadka sanad dugsiyeedka marka ay jirsadaan 21 sano haddii ay u baahan yihiin wakhti dheeraad ah oo ay ku gaaraan yoolalkooda.

KALA-GUURKA

Laga bilaabo da’da 16, IEP-ga waa inuu ka caawiyaa ardayda inay qorsheeyaan nolosha kadib dugsiga sare. IEP-ga Kala-guurka wuxuu diiradda saaraa hagaajinta xirfadaha ardayga si loogu diyaariyo nolosha dugsiga sare kadib. La-taliyeyaasha Baxnaanada Farsamada (VR) ayaa laga heli karaa dugsi sare kasta oo ku yaalla Minnesota si tani ay uga caawiyaan. Marka ardaydu ay gaaraan 18, waxay sharci ahaan noqdaan qaangaar waxayna gaari karaan go’aamada ku saabsan IEP-gooda ilaa in qof ka mas’uul ah loo magacaabo mooyee.

QAYBTA 3

Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed [IEP-yada]

IEP-GU WAA DARIIQA CANUGAAGA UU KU GUULAYSANAYO. DUGSIYADU WAA INAY CANUGAAGA SIIYAAN WAXBARASHADA UU XAQA U LEEYAHAY, WAADNA QAABAYN KARTAA SIDA TAASI AY U EGTAHAY.

WAA MAXAY IEP?

Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP) waa qorshe loogu talagalay ardayda naafada ah ee loo qiimeeyay una qalma adeegyada waxbarashada gaarka ah. Wuxuu xaqiijiyaa in ardayda naafada ah ay qaataan waxbarashada ku habboon baahiyahooda. IEP-ga waxaa sanad kasta qora koox ay ku jirto dugsiga, waalidiinta iyo ardayga iyadoo ay ku xiran tahay da'da. Ujeedada IEP waa in la ilaaliyo helitaanka waxbarashada ee canugaaga.

QEYBAHA ASAASIGA AH EE IEP

	WAXA UU YAHAY	RAADI
Heerarka Hadda (PLAAFP)	Waxa uu qeexaa ardayga xirfadihiisa hadda, baahiyihiisa, iyo sida naafadiisu u saamayso waxbarashadiisa.	Xaqiiji in PLAAFP si sax ah u muujinayso xirfadaha ardayga iyo caqabadaha ka haysta dhinacyada tacliinta, bulshada, habdhaqanka, jirka, shaqada, dareenka, & wada-xiriirka.
Yoolalka & Ujeedooyinka	Yoolalka tacliinta, bulshada, wada-xiriirka, iyo nolol-maalmeedka.	Xaqiiji in yoolalka ay yihiin kuwo gaar ah, la cabbiri karo, khuseeya, oo wakhti ku xiran. Xaqiiji in yoolalka ay ku qotomaan baahiyaha hadda iyo kuwa mustaqbalka ee canugaaga
Adeegyada & Taageerooyinka	Faahfaahinayaa adeegyada, tignoolajiyadda, & gaadiidka ardayga uu u baahan yahay. Tani waxaa ka mid noqon kara adeegyada sida Baxnaanada Hadalka ama Shaqada.	Xaqiiji in dhammaan adeegyada & taageerooyinka ay ku jiraan IEP-ga ayna ku filan yihiin inay taageeraan marin-u-helka ardayga ee waxbarashada & waxqabadyada dugsiga, iyo ardayga inuu horumar ka samaynayo yoolalkiisa.
Hoysiinada & Wax-u-Habaynta	Wax ka beddel la sameeyo si ardayga looga caawiyo inuu ku guulaysto dugsiga.	Xaqiiji in hoysiinada ay yihiin kuwo gaar ah, habboon, oo taageeraya baahiyaha waxbarashada ardayga. Xaqiiji inaad fahanto sida imtixaanka loo qaadayo iyo sida natiijooyinka loogu isticmaali doono in lagula socdo horumarka.
Qorsheynta Kala-guurka (Ku Bilaabanayo Fasalka 9-aad)	Qorshayaasha nolosha kadib dugsiga sare.	Xaqiiji in canugaaga uu hayo dhabbaha qalin-jebinta iyo in yoolalka kala-guurka iyo adeegyada ay ardayga u diyaariyaan nolosha.
Qorshaha Wax Ka Qabashada Habdhaqanka (Behavior Intervention Plan, BIP)	Xeelado lagu taageero habdhaqanka wanaagsan laguna maareeyo caqabado kasta.	Xaqiiji inaad garanayso sababta qorshaha BIP loogu baahan yahay iyo in qorshaha BIP uu wax ka qabanayo habdhaqanada gaarka ah; uu qeexayo istiraatiijiyo cad; kuna lug leeyahay shaqaalaha dugsiga, waalidiinta, & khuburada ay khusayso.
Meelaynta	Waxa uu sharraxayaa sida ardayga uu uga qaybqaadan doono waxbarashada & sababta.	Xaqiiji in canugaaga uu ku jiro waxbarashada guud ilaa inti suurtagal ah. Ka soocid kasta waa in si cad loo sharraxaa. Waxaad codsan kartaa liiska waxyaabaha uu dugsigu isku dayay inuu waxbarashada guud ka dhigo mid shaqaysa..
Gaadiidka	Dugsiyada waxay bixin karaan taageero dheeraad ah ama habab kale oo gaadiid. methods.	Xaqiiji in macluumaadkani uu ku jiro warbixinta qiimaynta canugaaga iyo heerarka hadda ee IEP, iyo in kooxda IEP ay ka wada-hadasho baahiyaha canugaaga waxna looga qabto IEP-ga dhexdiisa.

WAXYAABAHA KALE EE KU JIRA IEP

ADEEGYADA SANAD DUGSIYEEDKA LA DHEEREEYAY (ESY)

Adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereeyay (ESY) waa adeegyo waxbarasho oo gaar ah oo la bixiyo inta lagu jiro fasaxyada dugsiga, sida fasaxa xagaaga ama fasaxa gu'ga, oo la siiyo ardayda laga yaabo inuu dib-u-dhac ku yimaado inta lagu jiro fasaxyada dhaadheer. Kooxda IEP-ga ardayga ayaa go'aamisa in ardayga uu uqalmo una baahan yahay adeegyada ESY.

ADEEGYADA CAAFIMAADKA MASKAXDA

Dugsiyada waxay ardayda ka caawin karaan baahiyaha caafimaadka maskaxda iyagoo u maraya la-talin ama adeegyo kale. Adeegyadani waxaa laga yaabaa inay qayb ka yihiin IEP-ga ardayga.

GOOBAHA WAXBARASHO

Adeegyada waxbarashada gaarka ah waxaa lagu bixiyaa "goobo" kala duwan, iyadoo la xaqiijinayo ardayda inay helaan taageerada saxda ah iyadoo isla markaana lagala qaybgelinayo asaagooda ilaa inti macquul ah. Habkan waxaa loo yaqaanaa Deegaanka Ugu Xaddidaada Yar (LRE).

Marka la gaarayo go'aamada ku saabsan LRE, maalinta dugsiga oo dhan ee ardayga waa in la baaro. Go'aanka LRE waa inay si sanadle ah u sameeyaan kooxda IEP oo ay ku gaaraan kulanka IEP.

QODOBADA MUHIIMKA AH EE KU SAABSAN LRE

- Sharciga wuxuu u baahan yahay inay jiraan goobo kala duwan si arday kasta uu u dhigto dugsiga aadka ugu habboon, iyadoo lagu salaynayo baahidiisa. Go'aamada ku saabsan LRE waa in lagu xisaabtamaa baahiyaha tacliinta iyo kuwa aan tacliinta ahayn labadaba
- Deegaanka dugsiga waa in loo qaabeeyaa baahiyaha gaarka ah ee arday kasta.
    - Go'aamada meelaynta waa in aan lagu salayn nooca ama darnaanta naafada, helitaanka adeegyada, ama booska dugsiga.
    - Fasalka caadiga ah waa in la isku dayaa marka koowaad. Xulashooyin aad u xaddidan waa in laga hadlaa oo kaliya haddii kooxda IEP ay isku-daydo adeegyo kala duwan kuna taageerto waxbarashada guud oo ardayguna uusan weli helaynin waxa uu u baahan yahay si uu horumar u sameeyo.
- Ardaydu waa inay fursad u hesho inay la macaamisho asaagooda aan naafada ahayn ilaa inti macquul ah. Kooxda IEP waa inay sahmisaa adeegsiga kaalmooyinka iyo adeegyada kahor inta aysan go'aamin goob aad u xaddidan.

QIIMAYNTA HABDHAQANKA SHAQAYNTA (FBA) & QORSHAHA WAX KA QABASHADA HABDHAQANKA (BIP)

Qiimaynta Habdhaqanka Shaqaynta (FBA) waa tijaabo lagu ogaado waxa ardayga u keenaya habdhaqanka caqabada ah. Waxaa loo sameeyaa iyadoo la indho-indhaynayo qaababka habdhaqanka ardayga. Badanaa, ardaydu waxay yeeshaan habdhaqan qallafsan haddii baahiyahooda aan la daboolin. Xaaladaas, waxaad u doodi kartaa in isbeddelo lagu sameeyo IEP-ga si wanaagsan si loogu daboolo baahiyaha canugaaga.

Marka FBA la dhammeystiro oo warbixinta dib-u-eegis lagu sameeyo, Qorshaha Wax Ka Qabashada Habdhaqanka (BIP) ayaa la abuuraa. Qorshaha waxaa ka mid ah waxyaabaha la isku-dayo in lagu xalliyo dhibaatada iyo yoolal lagula socdo horumarka. Kooxda IEP waxay dib-u-eegis ku samayn kartaa oo ay hagaajin kartaa qorshaha haddii loo baahdo.

Ardayga ayaa yeelan kara qorshaha BIP xitaa haddii uusan lahayn IEP. Tusaale ahaan, ardayga leh qorshaha 504 wuxuu yeelan karaa qorshaha BIP haddii uu qabo arrimo habdhaqan oo faragelinaya waxbarashada ama shaqada maalinlaha ah. Ardayda naafada ah ee leh IEP-ga, qorshe BIP ayaa badanaa loogu daraa haddii habdhaqankooda uu saamaynayo waxbarashadooda ama waxbarashada ardayda kale. Kooxda IEP ayaa ku dari doonta qorshaha BIP si ardayga uu u helo taageero uu u dhaqmo si habboon.

Haddii qorshaha BIP uusan caawinaynin, waxaad:

- Waydiisan kartaa kulan. La wadaagi kartaa waxa aad u malaynayso inay si fiican ugu shaqaynayaan. Kooxdu waxay beddeli kartaa xeeladaha iyo taageerada haddii loo baahdo.
- Codso IEE: Haddii aadan ku raacsanayn natiijada FBA, waxaad codsan kartaa Qiimayn Waxbarasho oo Madax Bannaan (IEE) oo uu bixinayo dugsiga.
- Raadso Caawimo Dheeraad ah: Raadi kheyraadka kale sida la-talinta, baxnaanada, ama barnaamijyada bulshada ee caawin kara canugaaga.
- Xallinta khilaafka: Ka eeg Qaybta 4 wixi xog dheeraad ah.

HOYSIINADA IMTIXAAN QAADISTA

Hoysiinada imtixaan qaadista waxay xaqiijiyaan in ardayda naafada ah imtixaanka looga qaado si caddaalad ah. Imtixaanaadka badankooda, ardayda leh IEP ama Qorshaha 504 waxay helaan hoysiino.

Waa kuwan dhowr tusaale:

- Qaabab Kale: Agabka imtixaanka oo lagu bixiyo qaabab kale sida farta waawayn, Farta indhoolaha, ama qaababka elektaroonigga ah si loo meelsiiyo naafooyinka aragga ama baahiyaha kale.
- Tignoolajiyadda Wax Caawisa: Adeegsiga aaladaha ama softiweerka, sida aaladaha akhriya shaashada ama aaladaha hadalka u beddela qoraalka.
- Qolal Imtixaan-qaadis oo Gaar ah: Deegaano aan buuqlahayn ama xor ka ah carqaladaynta si loo yareeyo waxyaabaha mashquuliya dareenka ama waxyaabaha kiciya walbahaarka
- Qoraa ama Akhriye: Caawimo ka socota qof u qoro jawaabaha ama kor ugu akhriya su'aalaha imtixaanka
- Dhextaal Nasiino: Dhextaalo loo qorsheeyay inta lagu jiro imtixaanka

QORSHAYAASHA 504

Qorshaha 504 wuxuu xaqiijiyaa in ardayda ay helaan waxa ay rabaan si ay u galaan fasalka waxbarashada guud ugana qaybqaataan hawlaha. IEP-ga wuxuu ka koobnaan karaa qorshaha 504, balse qorshaha 504 keligiis kama dhigna in arday uu uqalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah. Waxay taa beddelkeeda diiradda saaraan hoysiinada. Qorshaha 504 waxaa qora koox shaqaalaha dugsiga ah waxaana badanaa ka mid ah waalidiinta, iyo sidoo kale canugga iyadoo ay ku xiran tahay da'da. Qorshaha 504 waxaa ka mid noqon kara waxyaabaha sida:

- Wakhtiga dheeraadka ee imtixaanaadka
- Imtixaan ku qaadista fasal gaar ah
- Shaqo guri oo la soo gaabiyay ama wax laga beddelay
- Buugaagta codka ama qaababka kale ee tignoolajiyadda wax caawisa
- Hoysiinada kale ee taageera naafada iyo baahiyaha ardayda

WAKHTIGA & HANNAANKA QORSHAYAASHA QAYBTA 504:

Si ka duwan IEP-yada, kuwaasoo leh wakhtiyo sharci, Qaybta 504 waa mid aad u dabacsan. Tallaabooyinkani waa inay ku dhacaan wakhti macquul ah:

1. Gudbinta ama Codsashada Qiimaynta: Qofkasta ayaa gudbin kara arday haddii uu u maleeyo in ardaygu u baahan yahay in wax loo habeeyo naafo darteed.
2. Qiimaynta: Dugsiga wuxuu qiimeeyaa ardayga si uu u go'aamiyo in uu qabo naafo xaddidaysa waxqabadyada sida waxbarashada.
3. Go'aaminta Uqalmitaanka: Haddii uu uqalmo, qorshe 504 ah ayaa la abuuraa kaasoo taxaya hoysiinada gaarka ah.
4. Hirgelinta & La Socodka: Dugsiga wuxuu hawlgeliyaa qorshaha wuxuuna si joogta ah u hubiyaa ardayga.
5. Ogaysiinta & Ka-qaybgalka Waalidka: Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogaysiis, kaqaybqaataan kulamada, oo ay racfaan ka qaataan go'aamada la xiriira Qorshaha 504.
6. Dib-u-eegista & Cusboonaysiimaha: Qorshaha waxaa dib-u-eegis lagu sameeyaa si sanadle ah

QAYBTA 4

Xuquuqaha Sharciga & Ilaalinada

WAXAAD HAYSATAA IKHTIYAARO BADAN OO AAD KU XALLISO KHILAAFYADA, LAGA BILAABO WADA-SHEEKEYSIYO FUDUD ILAA KAQAYBGELINTA WAKAALADAHA GOBOLKA & FEDERAALKA.

WAXBARASHADA DAWLIGA HABBOON EE BILAASHKA AH (FAPE)

Dhammaan ardayda naafada ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho dawli ah oo ku habboon oo bilaash ah. Waxay helaan caawimo iyo adeegyo aysan lacag uga baxayn waalidiinta, adeegyadani waa in loo sameeyaa in lagu daboolo baahiyaha ardayga.

ILAALINADA HABRAACEED

Tallaabooyinkani waxay u jiraan in lagu ilaaliyo xuquuqaha ardayda. Waalidiintu waa inay helaan sharraxaad cad oo ku saabsan Ilaalinada Habraaceed ugu yaraan halmar sanad dugsiyeed kasta.

ILAALINADA HABRAACEED EE MUHIIMKA AH

- **Oggolaanshaha Xog Ogaalka ah**: Dugsiyadu waa inay oggolaansho qoraal ah ka helaan waalidiinta kahor inta aysan bixin qiimaynta ama aysan bixin adeegyada waxbarashada gaarka ah marka ugu horraysa.
- **Marin-u-helka Diiwaanada Waxbarasho**: Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay dib-u-eegis ku sameeyaan oo ay helaan nuqulada diiwaanada ubadkooda.
- **Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Bannaan (IEE)**: Waalidiinta waxay codsan karaan qiimaynta IEE oo uu dugsiga bixinayo kharashka haddii aysan ku raacsanayn dugsiga.
- **Asturnaanta Sirta**: Xogta waxbarasho waa inay asturnaataa wakhti kasta.
- **Ogaysiiska Qoran ee Hore (PWN)**: PWN waa dukumiinti ay tahay dugsiyada inay siiyaan waalidiinta kahor inta aysan isbeddel ku samayn IEP-ga ardayga. Waxa uu sharraxaa tallaabooyinka uu dugsigu qorshaynayo inuu qaado ama uusan qaadin iyo sababta, wuxuu soo koobaa kulamada, wuxuuna qoraa xogta loo adeegsado go'aamada. PWN waa inuu yahay mid la fahmi karo.
    - Dugsiyada waxay u baahan yihiin PWN ka hor qiimaynta hore ama samaynta IEP-yada ugu horreeya. Tallaabooyinka kale, waalidiinta waxay haystaan 14 maalmood inay ku diidaan kahor inta uusan dugsigu guda galin. Haddii waalidiintu dhahaan "maya", dugsigu waa inuu bixiyaa kulan heshiisiin ah.
    - Xusuusnow: "Haddii uusan qoraal ahayn, marna ma dhicin." Marwalba farriin qoraal ah ka daba-gee wada-hadalada ku saabsan adeegyada canugaaga, iyo kadib codsi kasta oo qoraal ah oo aad samayso, waa inaad PWN ka heshaa dugsiga oo dhahaya haa ama maya oo ku aadan codsigaaga oo wata sababtooda. Haddii aysan soo dirin PWN, mid codso oo ku hayso diiwaanadaada.

XALLINTA KHILAAFKA

Go'aamada muhiimka ah waxaa lala sameeyaa waalidiinta, koox shaqaale dugsiga ah, iyo mararka qaar ardayga. Haddii ay jiraan khilaafaad, Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) waxay leedahay hab lagu caawiyo.

SHIRKA HESHIISIINTA

Shirka heshiisiinta waa kulan u dhexeeya waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga si loo xalliyo khilaafaadka IEP. Shirarka heshiisiinta waxay leeyihiin wakhtiyo gaar ah. Yoolalka waxay xal u helayaan IEP-ga iyadoo isla markaana la joogtaynayo xiriir. Waa inaad codsataa shir heshiisiin ah haddii aadan ku raacin IEP-ga la qorsheeyay ama go'aan lagu soo gudbiyo PWN.

SI AAD U CODSATO SHIR HESHIISIIN AH:

Qor warqad ama iimayl oo aad u dirayso maareeyaha kiiska waxbarashada gaarka ah ee canugaaga ama agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmada.

- Warqadan dhexdeeda:
    - Si gaar ah u sheeg waxa aad diidan tahay iyo sababta.
    - Si cad u sheeg inaad codsanayso shir heshiisiin ah.
    - Ku dar magacaaga, xogta xiriirka (sida lambarka taleefanka ama iimaylka), iyo wakhtiyada ugu fiican ee lagula soo xiriiri karo.
- Dugsigu waa inuu bixiyaa shir heshiisiin ah 10 maalmood gudahood marka uu helo codsigaaga.
- Shan maalmood oo dugsi gudahood kadib shirka, degmadu waa inay ku siiso warbixin kooban oo ku saabsan kulanka & wixii isbeddel ah ee la qorsheeyay.
- Dukumiintiyadani waxaa loo adeegsan karaa cadayn ahaan xagga dhagaysiga nidaamka cadaaladda.
- Qodobada Muhiimka ah
    - Waxyaabaha la sheego inta lagu jiro shirka heshiisiinta waa kuwo sir ah loomana adeegsan karo dhagaysiga nidaamka cadaaladda.
    - Qiimaynta hore, meelaynta, ama adeegyada waxbarashada gaarka ah, dugsigu waa inuu helaa oggolaanshahaaga qoran kahor inta uusan guda-galin.
    - Shirka looma adeegsan karo in dib loogu dhigo ama laguu diido xuquuqdaada inaad hesho dhagaysi caddaaladeed.
    - Haddii aadan kaqaybqaadan shirka heshiisiinta, degmada dugsiga waxay kugu wargelin doontaa sida loo codsado dhagaysi caddaaladeed iyo ilaalinada kale ee habraaceed.

XULASHOOYINKA KALE EE KHILAAF XALLINTA

KULAMO KOOXEEDKA LA FUDUDEEYAY

- Waxa Uu Yahay: Caawiye dhexdhexaad ah ayaa ka caawiya kooxda IEP-ga si loo abuuro ama loo beddelo IEP-ga loona xalliyo wixi khilaafyo ah.
- Goorta la Isticmaalo: Horraanta hannaanka IEP marka khilaaf uu soo kordho.
- Natiijada: IEP ay kooxda oo dhan ay isku raacsan tahay.
- Sida loo codsado: Onlaynka ka buuxi foomka codsiga: **education.mn.gov/MDE/dse/sped/conf/team/**

DAAWADA

- Waxa Uu Yahay: Hab ikhtiyaari ah halkaasoo caawiye dhexdhexaad ah uu xalliyo khilaafaadka u dhexeeya waalidiinta & dugsiga.
- Goorta la Isticmaalo: Haddii kulamo kooxeedka la fududeeyo aanay keenin xal ama haddii xiriirada ay xumaadaan.
- Kaqaybgalayaasha: Waalidiinta, u-doode, ardayga (haddii ay habboon tahay), barayaasha, & wakiil degmo.
- Muddada: La muddeeyo saddex toddobaad gudahood marka la codsado, soconayo afar saacadood si fogaan arag ah ama lix saacadood fool-ka-fool ah.
- Natiijada: Haddii lagu guulaysto, dhexdhexaadinta waxay keeni doontaa heshiis sharci ahaan loo hoggaansamayo.
- Sida loo codsado: Onlaynka ka buuxi foomka codsiga: **education.mn.gov/MDE/dse/sped/conf/med/**



CABASHOOYINKA KU SOCDA WAAXDA WAXBARASHADA EE MINNESOTA (MDE)

- Waxa Uu Yahay: Waalidiinta waxay cabasho ka xarayn karaan wakaaladda gobolka haddii ay rumaysan yihiin in dugsiga uusan raacaynin sharciyada waxbarashada gaarka ah.
- Goorta la Isticmaalo: Haddii isku-dayadi hore ee wax lagu xallinayay ay guuldarraysteen, ama haddii uu jiro ku xadgudubka shuruucda waxbarashada gaarka ah.
- Qoritaanka Cabashada: Cabashooyinka waa in la qoraa waana in nuqul loo diraa degmada dugsiga ee ku lugta leh. Waxaad isticmaali kartaa foomka halkan: **education.mn.gov/MDE/dse/sped/conf/Comp/**
- Dib-u-eegis: MDE waxay go'aamin doontaa in la tixgeliyo ama meesha laga saaro cabashada.
- Geedi Socodka Baaritaanka: Baare ayaa la xiriiri doona qofka xareeyay cabashada, la xiriiri doona degmada dugsiga, dib-u-eegi doona dukumiintiyada, oo gaari doona go'aan.
- Wakhtiga Go'aanka: Baaraha wuxuu haystaa 60 maalmood oo uu ku gaaro go'aan, kaasoo la kordhin karo haddii loo baahdo.
- Natiijooyinka:
    - Xadgudub La Helo: MDE waxay soo saari doontaa Qorshe Tallaabo Sixid ah waxa ayna xaqiijisaa in dugsiga uu saxo dhibaatada.
    - La Helin Xadgudub: Cabashada waa la soo xiraa. Waalidiinta waxay racfaan uga qaadan karaan Maxkamadda Racfaanka Minnesota 60 maalmood gudahood.

DHAGAYSIGA NIDAAMKA CADAALADDA

- Waxa Uu Yahay: Dhagaysi rasmi ah halkaasoo sarkaal dhexdhexaad ah uu xal keeno
- Yaa Codsan Kara: Waalidiinta ama degmo dugsiyeedyada
- Hannaanka:

    1. Kaqaybgal kulan xal-raadin ah
    2. Caddayn ku soo bandhig dhagaysiga
    3. Hel go'aan loo hoggaansamayo

- Goorta la Isticmaalo: Haddii cabashooyinka aysan arrinta xallin ama khilaafyada culus ee ku lug leh aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta, iyo adeegyada la siiyo ardayga
- Racfaanada: Go'aanka waxaa racfaan loogu qaadan karaa maxkamad gobol ama federaal
- Sii Socoshada Meelaynta Hadda: Sida uu dhigayo qodobka "sii socoshada meelaynta hadda", haddii dhagaysiga garmaqalka caddaaladeed la codsado, canugga wuxuu ku sii jirayaa meelaynta waxbarasho ee hadda inta khilaafka la xallinayo, ilaa dhinacyadu si kale ay isku raacaan mooyee

XEERARKA XUQUUQDA AADANAHA EE MINNESOTA (MHRA)

MHRA waxay xaqiijisaa in ardayda oo dhan ay marin loo siman yahay u helaan fursadaha waxbarashada. Haddii aad u malaynayso in canugaaga la takooray:

1. Qor Arrinta:
    - Qor diiwaanka dhacdooyinka, oo ay ku jiraan taariikhaha, wakhtiyada, waxa dhacay, iyo wada-xiriir kasta oo aad la yeelato dugsiga oo ku saabsan arrinta.
2. La Xiriir Dugsiga:
    - Kala hadal macalinka canugaaga, maamulaha, ama isku duwayaasha waxbarashada gaarka ah. Waxaa muhiim ah inaad ula hadasho si cad oo aad bixiso tusaalooyin gaar ah.
3. Xaree Cabasho:
   Haddii arrinta uusan xallin dugsiga, waxaad cabasho ka xarayn kartaa:
    - **Isku Duwaha Qaybta 504 ee degmada dugsiga** – Degmo dugsiyeed kasta waxay leedahay qof u xilsaaran inuu ka shaqeeyo cabashooyinkaan
    - **Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Minnesota (MDHR)** – Waxaad haysataa hal sano laga bilaabo taariikhda shilka si aad u xarayso warbixin. Waxaad foomka ka buuxin kartaa halkan: **mn.gov/mdhr/intake/consultationinquiryform**
    - **Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah (OCR)** – Waxaad haysataa 180 maalmood laga bilaabo taariikhda takoorku dhacay si aad cabasho u gudbiso. Macluumaad dheeraad ah kahel halkan: **ed.gov/about/offices/list/ocr/complaintintro.html**
4. Raadso Talo Sharci:
    - Haddii loo baahdo, talo ka raadso qareen ka shaqeeya waxbarashada ama sharciga naafada. Waxay hagitaan kaa siin karaan xuquuqahaaga iyo xulashooyinkaaga.

XOOG SHEEGASHADA & DHIBAATAYNTA

Haddii arday loo xoog sheegto, waalidiinta waa inay u sheegaan dugsiga isla markaaba. Dugsiyadu waa inay qaadaan tallaabo ay ku joojinayaan xoog sheegashada ayna ilaaliyaan ardayga. Dugsiyadu waa inay xaqiijiyaan in xoog sheegashada ay ka ilaaliyaan ardayda si ay u helaan xuquuqdooda waxbarasho. Haddii dugsigu aanu xallin arrinta, waalidiintu waxay u dacwoon karaan degmada dugsiga ama waxay kaalmo ka raadsan karaan ururada bulshada.

ILAALINADA & SHURUUCDA KU AADAN EDBINTA ARDAYDA NAAFADA AH

Canugaaga waxaa ilaaliya shuruuc u dejiya heerarka sida dugsiyada ay u edbin karaan.

- Dugsiyada looma oggola inay wax ku dhuftaan ama uleeyaan ardayda. Sidoo kale ma isticmaali karaan xakamaynta figaynta ama qabashada jireed ee ku adkayn karta ardayga inuu neefsado. Si kasta oo ay noqotaba, awood macquul ah ayaa la adeegsan karaa si loo xakameeyo ardayga marki ay lagama maarmaan noqoto in looga hortago waxyeello.
- Dugsiyada waxay kaliya adeegsan karaan gooni-u-saaridda iyo xakamaynta jireed marki si buuxdo loogu baahan yahay in ardayga ama dadka kale looga ilaaliyo inay waxyeello soo gaarto. Gooni-u-saaridda looma oggola carruurta jirta da'da dhalashada ilaa fasalka 3aad. Dugsiyadu gooni-u-saaridda uma adeegsan karaan sidi habraac xaalad degdeg ah.
- Dugsiyadu waa inay diiwaangeliyaan adeegsi kasta oo habraacyadaan ah ayna dib-u-eegis ugu sameeyaan si joogta ah.
- Kahor tallaabooyinka edbinta ee waawayn, dugsiyadu waa inay adeegsadaan hab la yiraahdo Ogaanshaha Falka si loo go'aamiyo in habdhaqanka ardayga uu la xiriiro naafadiisa. Tani waxay xaqiijisaa in ardayda aan loola dhaqmin si aan caddaaladda ka baxsan xagga habdhaqanada la xiriira naafadooda.

HADDII AAD U MALAYNAYSO IN CANUGAAGA LOOLA DHAQMAY SI AAN CADDAALAD AHAYN:

1. Qor Dhacdada: Oo ay ku jiraan taariikhaha, wakhtiyada, iyo xiriir kasta oo lala yeesho dugsiga.
2. La Xiriir Dugsiga: Kala hadal macalinka canugaaga, maamulaha, ama isku duwaha waxbarashada gaarka ah.
3. Xaree Cabasho: Haddii arrinta aan la xallin, waxaad cabasho u gudbin kartaa degmada dugsiga ama Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) lambarka 651-582-8689 ama mde.dispute-resolution@state.mn.us.
4. Raadso Talo Sharci: Haddii loo baahdo, waydii qareen ku takhasusay sharciga waxbarashada ama naafada. Ka eeg Qaybta 5 si aad uga hesho kheyraad dheeraad ah.

XEERKA XUQUUQDA WAXBARASHADA QOYSKA & ASTURNAANTA XOGTA (FERPA)

FERPA wuxuu ilaaliyaa asturnaanta diiwaanada ardayda. Xuquuqaha Muhiimka ah ee Hoos Yimaada FERPA waxaa ka mid ah:

1. Marin-u-Helka Diiwaanada:
   - Waalidiinta & ardayda jira da'da 18+ waxay xaq u leeyihiin inay arkaan diiwaanada waxbarashada ee dugsiga.
2. Codsashada Wax Ka Beddelka Diiwaanada:
   - Waalidiinta & ardayda jira da'da 18+ waxay qori karaan warqad ay ku waydiisanayaan inay saxaan diiwaanada. Dugsiga ayaa gaari doona go'aanka kama dambaysta ah. Haddii ay maya dhahaan wax ka beddelka, waa inay sharraxaan sababta oo ay waalidiinta ama ardayda siiyaan fursad kiiskooda ay kaga doodaan dhagaysi rasmi ah.
3. Koontaroolka Bixinta Xogta:
   - Dugsiyadu waa inay oggolaansho qoraal ah ka helaan waalidka ama ardayga jira 18+ si loo bixiyo xog ku jirta diiwaanka waxbarashada ardayga. Si kasta oo ay noqotaba, dugsiyada uma baahna oggolaansho haddii ay diiwaano la wadaagayaan mid ka mid ah kuwaan soo socda:
     - Masuuliyiinta dugsiga ee ka leh dan waxbarasho oo sharci ah
     - Dugsiga uu canugaagu u beddelanayo
     - Saraakiisha ku habboon ee xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka iyo badbaadada
     - Maamullada nidaamka cadaalada caruurta
4. Xogta Keydsan:
   - Dugsiyada waxaa laga yaabaa inay bixiyaan xogta "keydsan" sida magaca ardayga, ciwaanka, taleefoon lambarka, iyo taariikhaha soo xaadiritaanka ardayga oggolaansho la'aan. Dugsiyada waa inay ogaysiiyaan waalidiinta & ardayda uqalanta wixi ku saabsan arrintan ayna siiyaan qadar wakhti macquul ah oo ay ku aqbalaan wadaagista xogta.

Waxbadan oo ku saabsan FERPA ka ogow **understood.org/en/articles/ferpa-protecting-your-childs-records**

MAALGELINTA WAXBARASHADA GAARKA AH

Adeegyada waxbarashada gaarka ah waxaa la siiyaa ardayda uqalanta iyadoo uusan kharash uga baxaynin qoysaska. Dugsiyada waxay masuul ka yihiin daboolista kharashaadkaan.

Dugsiyada waxay lacag-celin ka raadsan karaan shirkadaha caymiska ama Medicaid wixi adeegyo ah oo la xiriira caafimaadka oo lagu daray IEP-ga ardayga, sida baxnaanooyinka ama tignoolajiyadda wax caawisa. Si kasta oo ay noqotaba, waalidiinta loogama baahna inay isticmaalaan caymiskooda gaarka ah haddii ay kharash bixinayaan, dugsiyaduna waa inay helaan oggolaansho qoraal ah kahor inta aysan adeegsan caymis gaar loo leeyahay ama xog la wadaagin Medicaid.

Dhammaan adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ku qeexan IEP-ga canugaaga waa kuwo bilaash kuu ah, iyadoo aan loo eegin sida degmada dugsiga ay u maalgeliso.

TIXGELINADA QOYSASKA KALA DUWAN

Bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga ELL) ee Naafada ah: Ardayda ELL ee naafada ah waa inay helaan adeegyada waxbarashada gaarka ah & taageerada luuqadda Ingiriisiga. Dugsiyada waa inay siiyaan qiimaynta iyadoo xisaabta lagu darsanayo dhaqanka & luuqadda ardayga si loo xaqiijiyo in aan wax khaldan lagu sheegin. IEP-ga waa inay ku jiraan yoolalka taageerada luuqadda & dhaqanka. Dugsiyadu waa inay waalidiinta siiyaan turjubaanada hadalka iyo dukumiintiyo fasiran haddii loo baahdo.

Xuquuqda Ardayda Labada Baahi Qaba (2e): Ardayda labada baahi qaba waa kuwo hibo leh hadana qaba naafo waxbarasho ama baahiyo kale oo gaar ah. Dugsiyada waa inay sameeyaan IEP xaqiijinaya in ardayda naafada ah ay helaan fursado lagu kobciyo hibadooda u gaarka ah lagana caawiyo naafadooda.

Carruurta Ciidanka ee Naafada ah: Barnaamijka Xubinta Qoyska ee Gaarka ah (EFMP) wuxuu taageero siiyaa qoysaska ciidanka. Minnesota waxay oggoshahay carruurta ciidanka ee naafada ah inay iska qoraan adeegyada la xiriira kahor inta aysan soo guurin. Tani waxaa looga fogaanayaa kala-go’ ku yimaada adeegga.

Carruurta Naafada ah ee Shaqaalaha Beeraha Soogalootiga: Carruurta shaqaalaha beeraha soogalootiga ee naafada ah waxay wajahaan caqabado gaar ah. Barnaamijyada sida Barnaamijka Waxbarashada Soogalootiga (MEP) ayaa caawin kara. Ka booqo **mn.gov/MDE/dse/ESEA/mig** ama wac 651-582-8579.

Carruurta Naafada ah ee Wajahaya Hoy’ La’aanta: Carruurta deggan guryo aan xasilnayn waxay sii joogi karaan dugsigooda waxayna heli karaan gaadiid xitaa haddii ay guurguuraan. Uma baahna dukumiintiyada caadiga ah sida caddaynta deganaanshaha. Waa inay helaan adeegyo waxbarasho oo la mid ah ardayda kale. Waa masuuliyadda dugsiyada inay helaan oo ay qiimeeyaan dhammaan carruurta naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa deggan guryaha aan xasilnayn.

Wakiilada Waalidka: Haddii ardaygu noqdo mid uu masuul ka yahay gobolka, gobolka ayaa xannaanaynaya. Ardaydani waxay xaq u leeyihiin waxbarashada gaarka ah haddii ay naafo yihiin. Wakiilka waalidka ayaa la dooran karaa si uu uga caawiyo baahiyaha dugsigooda una ilaaliyo xuquuqdooda. Gobolka wuxuu isku-dayi inuu ardaygu sii dhigto dugsigiisa hadda si arrimaha looga dhigo kuwo xasilan.

QAYBTA 5

Kheyraadka & Talada

KELIGAA MA TIHID - WAYDII SU'AALO OO ILAHAAN LAGU KALSOON YAHAY U ADEEGSO INAAD KA HESHO TAAGEERO.

TALOOYIN KU SOCDA WAALIDIINTA ARDAYDA NAAFADA QABTA

1. Meel ku xafid diiwaanada qiimaynta canugaaga, IEP-yada, kaararka warbixinta, diiwaanada caafimaadka, & wada-xiriirka aad la yeelato dugsiga.
2. Ku xirnow macalimiinta canugaaga si aad ula socoto horumarka una xalliso wixi walaacyo ah isla markaaba. Xaqiiji in wakhti kasta ay kula soo xiriiraan, oo aad fahamto waxa ay sheegayaan.
3. Ku biir kooxaha taageerada waalidka kana qaybgal aqoon-iswaydaarsiyada si aad ugu xirmato waalidiinta kale waxbadana uga ogaato u istaagista canugaaga.
4. Waydii su'aalo. Waxaad waydiisan kartaa in waxyaabaha si kale loo sheego haddii aadan fahmin.
5. U hadal baahiyaha ilmahaaga oo xaqiiji inay helaan adeegyada ay xaqa u leeyihiin. Xaqiiji in dhaqanka & luuqadda ilmahaaga lagu ixtiraamo dhammaan qaybaha waxbarashadooda.
6. Kala shaqee dugsiga in qorshe loo sameeyo canugaaga marka uu ka gudbayo dugsiga hoose oo uu u gudbayo dugsiga dhexe iyo dugsiga sare iyo haddii uu beddesho dugsiga.

SU'AALAHA TALLAABO KASTA OO KA MID AH GEEDI SOCODKA

Xusuusnow inay wanaagsan tahay inaad su'aalo ku waydiiso oo aad jawaabaha ku hesho qoraal!

AQOONSASHADA WALAACYADA

- Maxaa walaacyo ah oo aad qabtaa oo ku saabsan waxbarashada ama habdhaqanka canugayga?
- Maxaa la sameeyay ilaa iyo hadda si loo xalliyo walaacyadaan?
- Sidee ayay walaacyadani u saamaynayaan sida uu wax u qabto canugayga?
- Maxaan ku samayn karaa guriga si aan u taageero ilmahayga?

GUDBINTA

- Maxaad ugu malaynaysaa in canugayga uu u baahan yahay in loo qiimeeyo adeegyada waxbarashada gaarka ah?
- Sidee ayaan u taageeri karaa canugayga inta lagu jiro geedi socodkan?
- Waa maxay xuquuqaha aan leeyahay ka waalid ahaan inta lagu jiro geedi socodka gudbinta?

QIIMAYNTA IYO UQALMITAANKA

- Waa maxay dhinacyada la qiimayn doono inta lagu jiro qiimaynta?
- Sidee ayaa natiijada la iila wadaagi doonaa?
- Haddii aan ku raacsanayn natiijada qiimaynta, waa maxay xulashooyinkayga?

HORUMARINTA IEP

- Waa maxay yoolasha dhabta ah ee loo dejin doono canugayga?
- Waa maxay adeegyada & taageerooyinka uu canugaygu heli doono?
- Sidee ayaad ula socon doontaan horumarka oo aad iila wadaagi doontaan?
- Waa maxay hoysiinada iyo wax ka beddelada lagu samayn doono fasalka?
- Sideen ayaan guriga ugu taageeri karaa waxbarashada ilmahayga?
- Waa maxay qorshaha uu canugaygu ugu gudbayo heerka fasalka xiga ama dugsiga xiga?
- Yaan la xiriir karaa haddii aan qabo walaacyo ama su'aalo ku saabsan IEP-ga canugayga?

DIB-U-EEGISTA IEP-GA

- Sidee ayuu canugayga horumar uga sameeyay xagga yoolalkiisa IEP-ga?
- Miyay jiraan meelo uu canugaygu uga baahan yahay taageero dheeraad ah?
- Yoolalkaan mid ka mid ah ma loo baahan yahay in la beddelo, la cusboonaysiiyo, ama wax lagu daro?
- Sideen ayaan in badan ugu lug yeelan karaa wax ka caawinta horumarka canugayga?
- Miyay jiraan hoysiino ama wax ka beddelo cusub oo ay tahay in lagu soo daro?
- Sidee ayay kooxdu wax uga qaban kartaa meelo kasta oo uusan canugaygu horumar ka samaynaynin?
- Goorma ayaa kulanka dib-u-eegista ee xiga loo qorsheeyay?

KA BIXITAANKA

- Waa maxay heerarka ay tahay canugayga inuu buuxiyo si looga joojiyo helitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah?
- Sidee ayaa loola socon doonaa horumarka canugayga marka laga joojiyo IEP?

QALINJABINTA:

- Canugayga ma hayaa dhabbaha uu ku kasbanayo dhammaan buundooyinka loogu baahan yahay qalin-jebinta?
- Waa maxay caawimada dheeraadka ah ama isbeddelada uu canugaygu u baahan yahay si uu u helo buundooyinka ama uu ugu baaso imtixaanaadka?
- Waa maxay tignoolajiyadaha wax caawiya ee ka caawin kara canugayga inuu wax barto?

KALA-GUURKA

- Xirfadahee ayay tahay canugayga inuu diiradda saaro si uu ugu diyaarsanaado nolosha kadib dugsiga sare?
- Waa maxay kheyraadka ka caawin kara inuu canugaygu u gudbo qaangaarnimada?
- Yaan kala hadlaa haddii aan qabo su'aalo ama walaacyo kadib marka canugayga uu ka baxo adeegyada waxbarashada gaarka ah?

GOLAHA LA-TALINTA WAXBARASHADA GAARKA AH (SEAC)

Golaha La-talinta Waxbarashada Gaarka ah (SEAC) waa koox degmo dugsiyeedyada ka talo-siisa waxbarashada gaarka ah. Degmo dugsiyeed kasta waxay leedahay SEAC. Xubnaha waxaa ka mid ah waalidiinta, barayaasha, iyo wakiilada bulshada. Waalidiinta waxaa lagu booriyaa inay kaqaybqaataan. SEAC waxay degmada dugsiga u sheegaan sida loo isticmaalo kheyraadka si gacan looga gaysto adeegyada waxbarashada gaarka ah.

HELITAANKA DUGSIGA SAXDA AH

Waa mid lama huraan ah inaad soo hesho waxa ku habboon baahiyaha gaarka ah ee canugaaga. Waxaa laga yaabaa inuusan jirin dugsi dhammaystiran, balse waxaa jirta goob canugaaga uu ku kobci karo. Canugaaga wuxuu xaq u leeyahay inuu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah iyadoo aan loo eegin dugsiga uu dhigto. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan sida loo xusho dugsi, ka eeg Hagaha Sida Loo Xusho Dugsi. Waxaad sidoo kale eegi kartaa aaladaha sida MinneapolisSchoolFinder.org, oo bixiya xog ku saabsan dhammaan dugsiyada Minneapolis.

Waxaa halkaan ku yaalla qaar ka mid ah su'aalaha aad waydiin karto marka aad sahminayso xulashooyinkaaga:

- Waa maxay barnaamijka ka jira halkaas si wax looga qabto baahiyaha canugayga?
- Qadar intee la'eg oo ka mid ah maalinta dugsiga ayaa lagu qaataa fasalka waxbarashada guud?
- Waa kuwee macalimiinta & shaqaalaha la shaqayn doona ardaygayga?
- Sidee ayuu dugsiga uga caawin karaa canugayga inuu u diyaargaroobo nolosha dugsiga sare kadib?
- Maxaa dugsigan ka dhigaya mid ka duwan kuwa kale?

KHEYRAADKA KALE

ARC Minnesota: U-doodista shakhsiyaadka qaba naafada korriinka

- Webseedka: **arcminnesota.org**
- Taleefan: 952-920-0855 / 1-833-450-1494

CADREworks: Waxay bixisaa taageero inta lagu jiro khilaaf xallinta

- Webseedka: cadreworks.org/for-families
- Fiidiyowyada: **youtube.com/@cadreworks**

Help Me Grow: Hindise gobol oo leh macluumaad & kheyraad laga bilaabo dhalashada ilaa kindergarten

- Webseedka: **helpmegrowmn.org**
- Taleefan: 1-866-693-4769
- Limayl: **helpmegrow@state.mn.us**

Ururka Minnesota ee Caafimaadka Maskaxda ee Carruurta: Taageerada caafimaadka maskaxda ee carruurta.

- Webseedka: **macmh.org**
- Taleefan: 651-644-7333 / 1-800-528-4511

Xarunta Sharciga Naafada Minnesota: Kaalmada sharci ee arrimaha la xiriira naafada.

- Webseedka: **mylegalaid.org/disability-law-center**
- Taleefan: 612-334-5970 / 1-800-292-4150

Xarunta PACER: Xarun kheyraadka waalidka ah oo bixisa taageero, macluumaad, & tababar ku saabsan u-doodista waxbarashada gaarka ah

- Webseedka: **pacer.org**
- Taleefan: 952-838-9000 / 1-800-53-PACER

Mashruuca U-doodista Sharciga Waxbarashada ee SMRLS: Adeegyo sharci oo loogu talagalay qoysaska danyarta ah

- Webseedka: **smrls.org**
- Taleefan: 1-877-696-6529

St. Thomas Legal Clinic: Adeegyo sharci oo loogu talagalay qoysaska danyarta ah

- Webseedka: **stthomas.edu/interprofessional-center/legal-clinics**
- Taleefan: 651-962-4960

Understood: Waxay bixisaa kheyraad & taageero bilaash ah.

- Webseedka: **understood.org**

Erey-bixinta

Adeegyada Kala-guurka: Adeegyada ka caawiya ardayda qabta naafada inay ka guuraan dugsiga oo ay u gudbaan nolosha ka dambaysa dugsiga, sida kulleejka ama shaqada. Tani waxaa lagu daraa IEP-yada waxayna sidoo kale qayb ka noqon kartaa qorshaha 504 ee ardayda waawayn.

Adeegyada La Xiriira: Adeegyo dheeraad ah oo ardayga naafada ah uu u baahan karo si uu uga faa'iidaysto waxbarashadooda, kuwani waxaa ka mid ah baxnaanada hadalka, baxnaanada shaqada, la-talinta, ama gaadiidka.

Adeegyada Sanad Dugsiyeedka La Dheereeyay (ESY): Adeegyo waxbarashada gaarka ah oo la bixiyo inta lagu jiro xagaaga ama wakhtiyada kale ee ka baxsan maalinta dugsiga ee caadiga ah si looga hortago lumitaan wayn oo ku yimaada xirfadaha. Tani waxay qayb ka tahay IEP.

Ardayda Labada Baahi Qaba (2e): Erey loo adeegsado ardayda labada baahi qaba ee hibada leh hadana qaba naafo waxbarasho ama baahiyo kale oo gaar ah. Tani waxay ka dhigan tahay inay hibo u leeyihiin hal dhinac ama ka badan, sida xisaabta ama farshaxanka, balse sidoo kale ay caqabado ka haystaan dhinacyo kale, sida akhriska ama wax u dhug yeelashada. Ardaydani waxay u baahan yihiin xeelado waxbarid oo gaar ah oo ka caawiya inay adeegsadaan awoodahooda iyadoo isla markaana laga caawinayo caqabadahooda.

Asturnaanta Xogta (FERPA): Sharci federaal oo ilaaliya asturnaanta diiwaanada waxbarashada ardayga.

Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP): Qorshe qoran oo qeexaya adeegyada waxbarashada gaarka ah & taageerooyinka uu arday naafo ahi qaadan doono. Waxaa ka mid ah yoolalka, adeegyada, wax ka beddelada, & hoysiinada.

Barnaamijka Waxbarashada Soogalootiga (MEP): Barnaamij caawiya carruurta naafada ah ee shaqaalaha beeraha ee soo galootiga ah oo ka caawiya waxbarashada & taageerada ay u baahan yihiin. Barnaamijka wuxuu bixiyaa waxbaridda, fasalo dheeraad ah, & kheyraad kale.

Barnaamijka Xubinta Qoyska ee Gaarka ah (EFMP): Barnaamij waajib ah oo la shaqeeya wakaaladaha ciidanka & rayidka si loo bixiyo taageero bulsho, guriyayn, adeegyo waxbarasho, caafimaad, & kuwo shakhsi ahaaneed oo dhammeystiran iskuna dubaridan oo la siiyo qoysaska qaba baahiyaha gaarka ah.

Bartaha Luuqadda Ingiriisiga (ELL): Arday baranaya Ingiriisiga marka laga yimaado afkooda hooyo.

Baxnaanada Farsamada (VR): Barnaamij ka caawiya dadka naafada qaba inay sahmiyaan, u diyaargaroobaan, helaan, ayna ilaashadaan shaqooyinka.

Baxnaanada Jirka ama Baxnaaniyaha Jirka (PT): Baxnaano caawisa hagaajinta dhaqdhaqaaqa iyo maaraynta xanuunka.

Baxnaaniyaha ama Baxnaanada Shaqada (OT) : Baxnaano ka caawisa shakhsiyaadka inay sameeyaan ama dib u helaan xirfadaha loogu baahan yahay nolol maalmeedka & shaqaynta.

Deegaanka Ugu Xaddidaada Yar (LRE): Goobta u oggolaanaysa ardayda naafada ah inay wax la bartaan asaagooda aan naafada ahayn ilaa xad inti suurtagal ah.

Dhagaysiga Nidaamka Cadaaladda: Dhagaysi rasmi ah oo lagu xalliyo khilaafyada u dhexeeya waalidiinta & dugsiga oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee canugga ama qorshaha 504.

Heerarka Hadda ee Guulgaarista Tacliinta & Waxqabadka Shaqaynta (PLAAFP): Qayb ka mid ah IEP oo qeexaysa awoodaha hadda ee ardayda iyo sida awoodooda ay u saamaynayso waxbarashadooda.

Hoysiin: Isbeddelo lagu sameeyo sida ardayga uu wax u barto. Tusaale, siinta wakhti dheeraad ah oo uu ardaygu ku sameeyo imtixaanka.

Ilaalinada Habraaceed: : Xeerar ilaaliya xuquuqda ardayda qabta naafada iyo waalidiintooda. Xeerarkani waxa ay xaqiijiyaan in waalidiintu ay ku lug yeeshaan waxbarashada ilmahooda oo ay ogaadaan xuquuqdooda. Waxaa ka mid ah xaq ay uga qaybqaataan kulamada, ku arkaan diiwaanada dugsiga, oo ay kahor yimaadaan go'aamada ku saabsan waxbarashada ubadkooda. Liiska buuxa ee ilaalinada ka hel halkan: education.mn.gov/MDE/dse/sped/proc/

Kulanka Qorshaynta Qiimaynta: Kulan badanaa la qabto, balse aan qasab ahayn, si looga hadlo loona qorsheeyo qiimaynta waxbarashada gaarka ah ee ardayga. Waxaa ka mid ah waalidiinta, macalimiinta, & shaqaalaha kale ee dugsiga. Kooxdu waxay ka hadashaa walaacyada keenay qiimaynta, waxa ay yihiin tijaabooyinka gaarka ah ee la samayn doono, iyo cidda ku lug yeelan doonta.

Kulanka Uqalmitaanka: Kulan loo baahan yahay oo la qabto kadib marka qiimaynta waxbarashada gaarka ah ee ardayga la dhammeystiro. Ujeedada waxay tahay in looga hadlo natiijooyinka qiimaynta. Kulanka wuxuu ku lug leeyahay waalidiinta, macalimiinta, & shaqaalaha kale ee dugsiga. Kooxda waxay dib-u-eegis ku samaysaa qiimaynta si ay u go'aamiso haddii ardayga uu uqalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Naafada Barashada Gaarka ah (SLD): Cillad ku timaada mid ama ka badan oo ka mid ah hababka nafsaaniga ah ee ku lugta leh fahmidda ama adeegsiga luuqadda.

Nidaamka Cadaaladda: Nidaamka cadaaladda micnihiisu waa in qofkasta loola dhaqmo si caddaalad ah oo la raaco xeerar isku mid ah. Haddii ay jirto dhibaato ama khilaaf, waxaa jira qaab caddaalad ah oo lagu xalliyo laguna xaqiijiyo in qofkasta xuquuqdiisa la ixtiraamo.

Ogaanshaha Falka: Kulan lagu go'aamiyo in habdhaqanka arday ay keentay naafadiisa. Tani waa inay dhacdaa kahor inta uusan dugsigu bixin cawaaqib wayn, sida cayrinta in ka badan 10 maalmood. Haddii habdhaqanka ay sabab u tahay naafada, dugsigu waa inuu ku caawiyaa ardayga taageero wanaagsan oo aysan ahaan cawaaqib kaliya. Kulanka waxaa ka mid ah waalidiinta, macalimiinta waxbarashada gaarka ah, maamulka, & shaqaalaha kale sida shaqaalaha bulshada ama la-taliyayaasha.

Oggolaanshaha: Fasax ay bixiyaan waalidiinta si uu dugsiga u qiimeeyo ama adeegyo gaar ah u siiyo ilmahooda.

Qaybta Qorshaha 504: Qorshe hoy'siiya ardayda naafada qabta si loo xaqiijiyo guushooda tacliimeed iyo marin-u-helka deegaanka waxbarashada. Waa ay ka duwan tahay IEP sababtoo ah badanaa kuma jirto waxbarashada shakhsi ahaaneed.

Qiimaynta: Tijaabooyinka & indho-indhaynta lagu go'aaminayo in ardayga uu qabo naafo & waxa baahiyaha waxbarasho ay yihiin.

Qiimaynta Habdhaqanka Shaqaynta (FBA): Nidaam qiimayn ah oo lagu fahmo ujeedada ama shaqaynta habdhaqanka ardayga iyo xallinta.

Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Bannaan (IEE): Tijaabo uu sameeyo xirfadle aan u shaqayn degmada dugsiga, oo ay codsadaan waalidiinta haddii aysan ku raacin qiimaynta dugsiga.

Qorshaha Tallaabada Sixidda: Kadib baaritaan cabasho oo rasmi ah, haddii MDE (Waaxda Waxbarashada Minnesota) ay ogaato xadgudub waxay abuuraan qorshe tallaabo sixid ah kaasoo qoraya tallaabooyinka ay tahay dugsigu inuu qaado si uu u xalliyo dhibaatooyinka una xaqiijiyo inay raacaan xeerarka mustaqbalka.

Qorshaha Wax Ka Qabashada Habdhaqanka (BIP): Qorshe loogu talagalay in kor loogu qaado habdhaqanka ardayga ee dugsiga. Waxaa ka mid ah xeelado & taageerooyin wax looga qabto caqabadaha habdhaqanka, lagu baro habdhaqano wanaagsan, loogana caawiyo ardayga inuu guulaysto. Qorshaha BIP wuxuu qayb ka noqon karaa Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP) balse wuxuu sidoo kale u jiri karaa gaarkiisa ama wuxuu qayb ka ahaan karaa qorshaha 504.

Tignoolajiyadda Wax Caawisa (AT): Qalab ama aalado ardayga naafada ah ka caawiya inuu wax barto dadkana la xiriiro, sida softiweerka hadalka u beddela qoraalka, qalabka caawiya maqalka, ama waxyaabaha dareenka leh ee la taataabto.

U-wada-dhannaanshaha: Xaqiijinta in ardayda oo dhan, oo ay ku jiraan kuwa naafada ah, ay qayb ka yihiin fasalka caadiga ah & waxqabadyada dugsiga.

Waxbarashada Dawliga Habboon ee Bilaashka ah (FAPE) Xuquuqda ardayda naafada si ay u helaan waxbarasho & adeegyo bilaash u ah qoyska, oo laga helo labadaba IEP-yada & qorshayaasha 504.

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE): Xafiiska gobolka ee caawiya dugsiyada Minnesota. Waxay sameeyaan xeerarka waxayna bixiyaan kheyraad si ay u xaqiijiyaan in ardayda oo dhan ay hesho waxbarasho wanaagsan. Waxay sidoo kale macalimiinta & dugsiyada ku caawiyaan barnaamijyo & maalgelin. Waxay maareeyaan khilaafaadka u dhexeeya waalidiinta & dugsiyada ee ku saabsan IEP-yada & go'aamada waxbarashada gaarka ah.

Wax ka beddelada: Isbeddelada waxa arday laga filayo inuu barto. Tusaale, ka dhigista imtixaanka mid fudud.

Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah (OCR): Xafiis federaal oo dhaqangeliya shuruucda xuquuqda rayidka ee waxbarashada.

Xeerka Kaalmada Hoy' La'aanta ee McKinney-Vento: Sharci caawiya ardayda aan haysan guri xasilan. Wuxuu xaqiijiyaa inay aadaan dugsiga oo ay helaan taageerada ay u baahan yihiin, sida gaadiidka iyo agabka dugsiga, xitaa haddii ay ku nool yihiin hoy', albeergo, ama la nool yihiin qoysas kale.

Xeerka Naafada Maraykanka (ADA): Sharci ilaaliya xuquuqda dadka naafada.

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota (MHRA): Wuxuu mamnuucaa takoorka ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, da'da, xaaladda guurka, xaalad ku aadan kaalmada dadweynaha, damaca jinsi, ama naafonimada.

Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska & Xeerka Waxbarashada ee Shakhsiyaadka Naafada ah (IDEA): Sharci xaqiijiya in ardayda naafada ah ay helaan caawimada ay uga baahan yihiin dugsiga. Tani waxaa ka mid ah waxbarashada gaarka ah & adeegyada kale ee lagu taageero waxbarashadooda.

Yoolalka Sanadlaha ah: Bartilmaameedyada waxbarashada ee sanad kasta lagu dejiyo IEP-ga ardayga si looga caawiyo inuu horumar ka sameeyo dugsiga.

NOTES

Brought to you by Great MN Schools, a local non-profit organization. Find out more & donate at **greatmnschools.org**.

Kheyraad badan ka eeg onlaynka: gradeguides.greatmnschools.org/so/